# Xuquuqda Bukaanka iyo Masuuliyadaha

Children's Health℠ waxay xaqiijinaysaa bukaan kasta' xaqiisa uu ku helayo daryeelka loo gudbiyey qaab ka fiirsasho leh, ixitraam leh, sharaf leh oo raaxana leh. Waalid ahaan, masuulada ama wakiilada la oggolaaday ee bukaanka xaga Children's Health, waxaad leedahay xaqa aad ku hesho macluumaadka ku saabsan xuquuqahaaga iyo xeerarka cusbitaalka xeerarkaaga la xidhiidha xuquuqdan.

## Waalid ahaan, waxaad leedahay xaqa aad:

- **Kaga qeyb gasho** hawsha iyo go'aanka ku saabsan daryeelka caafimaadka ilmahaaga.
- **Filato** jawaabta macquulka ee codsi kasta oo macquul ah ee adeega gudaha awooda ay qaadi karto Children's Health, hawlgalkeeda la sheegay iyo sharciga .
- **Garato** magacyada dhakhtarada, kalkaalisooyinka iyo adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka kuwaas oo daryeela ilmahaaga.
- **Haysato** gaar ahaanshaha iyo xil qarinta daaweynta ee dhammaan wada xiriirka iyo diiwaanada khuseeya daryeelka ilmahaaga, gudaha xadadka sharciga.
- **Inuu kuu sheego** dhakhtar kula hadla ama luqad aad fahameyso, waxa ku saasan jirrada, daaweynta iyo rajooyinka bogsashada.
- **Hesho** macluumaad badan sida aad u baahan karto si laguu siiyo ama loo diido oggolaanshaha daaweyn kasta oo la soo jeediyey.
- **Aad gaarto** go'aamada, la tashiga dhakhtarka ilmahayaga, eee ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka . Tan waxaa ka mid ah xaqa lagu aqbalo ama lagu diido daryeelka caafimaadka ilmahaaga sida uu sharcigu oggolaaday iyo in laguu sheego cawaaqibka caafimaadka sida diidmada..
- **Dhammeystirto** Dardaaranka hore (tusaale; "dardaaranka nolosha') ilmahaaga sida uu oggolaado sharciga iyo in la filo adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ilmahaaga si loogu hogaansamo dardaaran sidaas ah.
- **Filato** maareynta saxda ah ee xanuunka ilmahaaga .
- **Aad ka qeyb qaadato** arrimaha anshaxa ee ku saabsan ilmahaaga daryeelkiisa.
- **Isticmaasho** telefoonka si loo sameeyo oo loo helo wicitaanada iyo in la ogaado in xayiraado kasta oo asbaabaha caafimaadka ah lagaala hadlayaa adiga.
- **Helida** diiwaanada caafimaadka ilmahaaga gudaha wakhti macquul ah.
- **La haato** xubin qoyska ah ama wakiilka doorashadaada iyo dhakhtarka ilmahaaga lagu wargeliyo dhigitaanka cusbitaalka ee ilmahaaga.
- **Lagu** daweeyo ilmahaaga raaxo iyo sharaf haddii ilmahaagu uu dhimanayo. Tan waxaa ku jira maareynta xanuunka ilmahaaga, astaamaha daweynta ka jawaaba iyo

aqoonsiga dhaqan, ruuxiyeed iyo murugada baahiyaha adiga, ilmahaaga iyo qoyskaaga.

- **Hesho** daryeelka ka xorta ah dhibaateynta ama xad gudubka ka yimid qof kasta.
- **Aad haysato** ilmahaaga oo ka xor ah xayiraadaha jirka ama xayiraadaha caafimaadka aan caafimaad ahaan aheyn lama huraan.
- **Aad haysato** ilmahaaga oo ka xor ah xayiraadaha ama go'doominta dhaqanka maamulka iyaddoo xaalad gurmad ah mooyaane.
- **Ku hesho** daryeelka goob badbaado ah.
- **Laguu daweeyo** si feejigan oo tixgelin leh iyaddoon loo eegin isirka, midabka, asalka qaranka, sinjiga, diinta, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, naafanimada, ama dhaqan, dhaqaale, ama asalka waxbarashadda.
- **Diido** inaad ka qeyb gasho mashruuc kasta oo cilmi baarid ah oo saameynaya daryeelka ilmaha iyo daaweynta.
- **Ka xor ahaato** in cabasho loo soo gudbiyo oo la helo faallo celin.
- **Hesho** caawimada la xiriirka adeegyada ilaalinta marka loo baahdo

## Bukaan ahaan, waxaad leedahay xaqa in:

- **Laguu sheego** wax kasta waa loo baahan yahay si loo fahmo sababta aad halkan u joogto.
- **Laguu sheego** dhab ahaan waxa la sameynayaa oo dhab ahaan waxay ay ahaaneysaa.
- **Lagu siiyo** jawaabo la fahmi karo su'aala kasta ama werwerka aad ka qabto daaweynta.
- **Aad u sheegto** qof kasta waxaad u maleyneyso oo aad dareento ee ku saabsan daaweyntaada iyo waxa adiga laguu qorsheeyay.
- **Garato** in markaad xanuun dareemeyso dadka adiga ku daryeelayaa ay ku dhageystaan oo kaa caawiyaan inaad ladnaato.
- **Aad haysto** wakhti iyo meelo lagu ciyaaro oo wax lagu barto.
- **Ay kuu sheegaan** way dadka u baahan inay taabtaan jirkaaga dhab ahaan waxa ay sameyneysaa iyo mida ay u sameyneysaa qaab degen oo qaar ah.
- **Aad haysto** qoyskaaga oo kula jooga adiga sida aad u doonto, mar kasta oo ay suuragal tahay.
- **Aad haysto** caawimada lagu ogaanayo sida loo daryeelo naftaada marka aad guriga tagto.
- **Aad** carooto, oydo ama ku sheegto waxa aadan jecleyn ee ku saabsan waxa adiga kugu dhacaya.
- **Aad ku qaabisho** booqdayaasha ay waalidku magacaabeen. Waalidku waxay ka noqon karaan ama diidi karaan magacaabidan wakhti kasta.

## Bukaan ahaan iyo waalid ahaan, waxaad leedahay masuuliyada aad:

- **Ku waydiiso** su'aalaha marka aanad fahmin waxa laguu sheegay ee ku saabsan daryeelka.
- **Ku siiso** macluumaad sax ah oo buuxa oo ku saabsan arrimaha la xiriira caafimaadka bukaanka.
- **Raac qorshaha daaweyntasi** wada jir aad isugu raacdeen adiga iyo kooxdaada daryeelka caafimaadka.
- **Kala hadal** dhakhtarkaaga waxa ku saabsan waxaad fileyso ee ku saabsan xanuunka iyo maareynta xanuunka.
- **Dhowr** bukaanada kale.
- **Raac** sharciyada cusbitaalka iyo xeerarka.
- **Ka warbixi** khataraha la ogaan karo ee daryeelka iyo isbeddelada aan la fileyn ee xaalada bukaanka.

## Waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad la hadasho:

- Kalkaalisada ama dhakhtarka ilmagaaga.
- Maareeyaha kalkaaliska ama maamulaha.
- Xiriirka wakiilka martida xaga Leenka Daryeelka 214-456-2273.
- Kormeeraha kalkaaliska (muddada fiidka ama saacadaha dhammaadka todobaadka, wac 214-456-7000).

Haddii adiga ama qoyskaagu aad dareentaan xuquuqahaaga sidii bukaan aan si xaqiiqsan loo taageer, waaad leedahay xaqa aad ku soo xarayso cabasho oo aad kaga hesho jawaabta qoran Guddida Xalalka Cabashada ee Children's Health ama aad soo xarayso cabashada leh hal wakaaladaha hoose.

Haddii aad dareento arrimahaaga inaan la xalilin ama aanay wax ka qaban Children's Health, waxaad la xidhiidhi kartaa:

**Xafiiska Guddida Wada jirka ah ee Tayada iyo Badbaadada Bukaanka**
One Renaissance Boulevard
Oakbrook Terrace, Illinois 60181
patientsafetyreport@jointcommission.org

**Kooxda U hogaansanka Xarunta Caafimaadka**
(MC 1979)
Texas Department of State Health Services
P.O. Box 149347

**hfc.complaints@dshs.state.tx.us**

1-888-973-0022 Khadka tooska ah ee cabashada

1-512-834-6653 Fagas: